

# Talooyin ku saabsan carruurta yaryar iyo isticmaalka shaashadda



Carruurta ka yar 2 sano waxay aalaaba jecel yihiin TV-ga, kobmiyuutarka gacanta iyo telefoonka gacanta, laakiin looma baahna in ay kuwaas isticmaalaan.

Looma baahna in uu TV ka daarnaado qol ay carruur ku ciyaarayaan.



Marka miiska cuntada la fadhiyo waannu sheekaysan karnaa, oo waxaannu abuuri karnaa caado cunta-cun oo wanaagsan. Iska daa isticmaalka shaashadda.

Telefoonka meel iska dhig marka aad ilmahaaga la joogto. Yaree digniinaha telefoonka kuugu soo dhacaya.



Ilmaha deji oo ka caawi sidii uu dareenkiisa u xakamayn lahaa asaga oo aan shaashad isticmaalin.

Ilmaha wakhti sii oo in badan kula sheekayso luuqad fudud. Ku guubaabi in ay ku ciyaaraan waxyaalo balaastik ah oo kale (klosser), sawir-gacmeed, kubbadda cagta, ciid iyo in ay carruuraha kale la ciyaaraan.



Haddii aad talooyinka raacdo waxaad xoojinaysaa aqoonta ilmaha, korriinkooda jir ahaaneed iyo caafimaadka maskaxdooda.

# Waa maxay sababta loogu baahan yahay in aan raacno talooyinka isticmaalka shaashadda?



**Sida ugu fiican ee luuqad lagu barto waa in dadka lala sheekaysto.** Carruurta sheekada wax bay ka bartaan, oo waxay bartaan fahamka calaamadaha uu bixinayo wejiga qofka la hadlaya, calaamadaha jirku bixinayo oo luuqaddii ayay si fiican ugu tababbartaan. Carruurta waa in ay waxyaalahaas oo dhan bartaan si ay ugu suurtagasho in ay dadka si fiican ula hadlaan marka ay weynaadaan. Carruurta waxyaalahaas shaashadda kama bartaan. Ereyo fudud iyo jumlado gaagaan isticmaal. Kala hadal waxa aad aragtaan iyo waxa aad qabanaysaan, tusaale ahaan sida «Haa, fiiri kubbadda! Waa kubbad weyn. Ma kuu dhiibaa?». Buug wada akhriya oo isla heesa.



**Carruurta waxay u baahan yihiin in dareenkooda laga caawiyo.** In shaashadda aad loogu isticmaalo in carruurta lagu dejiyo waxay wiiqi kartaa sidii ay dareenkooda hab fiican ugu maarayn lahaayeen. Ilmaha tus waxa la oggol yahay iyo waxa aan la oggolayn. Marka uu ilmuhu wax ka xumaado ama uu xanaaqsan yahay, adigu xasilloonow oo ilmaha laabta u qabooji. Waxa dhacay ilmaha kala hadal, tusaale ahaan sida «Adrian baa baaldigaagi qaatay. Waan ku arkaa in aad taas ka xumaatay oo aad xanaaqday. Laakiin lama oggola in Adrian wax lagu dhufto».



**Carruurta si ay wax u bartaan waxay u baahan yihiin in ay ciyaaraan.** Waxyaalo badan ayay bartaan marka ay dhaqdhaqaaq sameeyaan gudaha iyo dibedda ba, marka ay isticmaalaan dareemayaashooda, marka ay waxyaalo kala duwan taabtaan oo isticmaalaan iyo marka ay ciyaaraan intaba. Carruurta marka ay la ciyaaraan carruuraha kale iyo dadka waaweyn waxay bartaan xallinta mashaakilaadka. Waxay na sameeyaan horummar ah xagga jirka, bulshada iyo luuqadda. In tartiib meel loo fadhiyo oo shaashad la daawado sidaas oo kale wax looga baran maayo.